# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 10:21 AM** **Hansard No.20/2** **Kal-fadhi 20aad fadhiigsa 4aad**

***26/12/2012***

## ***Warbixinta Wasiirka Maaliyada ee Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2013***

***Ajendaha:*** - Miisaaniyada Qaranka ee sanadka 2013

**Gudoomiyaha Md. C/raxman Cirro:-** Maanta waxay Xukuuumadu gaar ahaan Wasaarada Maaliyada Qaranku inoo soo Gudbisey Miisaaniyadii Sanadka 2013ka, oo mudanayaasha loo qeybinayo, waxaana Golaha Fadhiya oo marti inoogu ah Wasiirka Maaliyada Md. C/caziiz Maxamed Samaale si warbixinta Miisaaniyada Golaha u siiyo isagaana iminka ku soo dhoweynayaa, ku soo dhowow Mudane Wasiir.

**Wasiirka Maaliyada** Md. C/caziiz Maxamed Samaale:-

Mudane gudoomiye gudoomiye ku xigeeno Golaha sharafta leh dhamaantiin waxaan idinku salaamayaa Asalaamu Calaykum Waraxmatulaahi Wa barakaatuhu, faxad wayn ayay iitahay maata oo ay bishu tahay 26/Dec/2012 in aan hortiina imaado aniga iyo dhamaan madaxda sare ee Wasaarada maaliyadu tiiyoo aan idiin soo bandhigayno kutalo galkii ama odoraskii miisaaniyada 2013 ka, farxad weyn ayay noo tahay sigaarana aniga farxad wayn ayay ii tahay anigoo golahan qiimaha leh mudo aad u dheer ka mid ahaa in aan anoo shaqo qaran gudanaya golaha hor imaado waanan hadalka ku bilaabi in aan marka hore ALLE umahad naqo ilaahay ayaa mahad is ka leh wixii ALLE fududeeyo ayaa fududaada wixii ALLE adkeeyaana waa adkaada waanan ALLE waydiisanaynaa wixii wanaag ku jiro inoo fudeydiyo intaa dabadeed.

Mahadaa ILAAHAY dabadeed waxaa mahad is ka leh dhamaan shaqaalaha wasaarada maaliyada masuuliyiin tooda kala duwan ee hawsha miisaaniyada 2012 suurto galiyay in sidoo loogu talo galay ay u soo baxdo mahad gaara ayaan u jeedinayaa, masuuliyiinta sare ee wasarada iyo dhamaan shaqaalaha kala duwanba oo dhamaantood aanay la'aan tood hawshaasi fusheen waxaan kaloon u mahad naqayaa dhamaan dadka ay shaqadu naga dhaxaysay gaar ahaan dadka reer Somalaliland ee runtii sida waayeel nimada, xilkasnimada

ah ee qiimaga leh ee ay u hureen in ay bixiyaan cashuurta ku waajibtay ay tahay ta suurto galisay in dakhligii 2012 uu isaga oo dhamaystiran soo xeroodo, waxaa kale oo aan u mahad naqayaa Golaha Wakiilada, Golaha Wasiirada iyo dhamaanba dadkii xilkasnimada muujiyay ee nala shaqeeyay hawshaa inta aan wadnay.

Wasaarada maaliyadu waa wasaarad ka mid wasaaradaha dawladeena waana wasaarad aan odhan karo runtii halbawle ayay u tahay wasaaradaha waana wasaarada u xilsaaran dhamaanba wixii dakhli ururintiisa waana wasaaarada U xilsaaran ururinta hantida umada bixinteeda iyo xilkeeduba waa wasaaradu uu saaran yahay weeye waanay ka hawl badan tahay xilka ay haysaana waa uu ka culus yahay xilal ka ay hayaan wasaarado kale oo badan. Dhamaanba wasaaradaha kale budget ay soo qortaan wixii looga helo waxay ka sugaan wasaarada maaliyada, wasaarada maaliyadu waa ta u xilsaaran in dhamaanba dakhliga dalka ay ururiso waa wasaarada u xilsaaran ciidan keena, shaqaaleheena iyo dhamaan hawlaha kala duwan ee qarankeena wixii lagu wadayay xilkeedu yahay in ay soo saarto hawshaana in ALLE inagu garab galay waan ugu mahad naqayaa.

Run ahaantii arinta dakhliga caqabado badan iyo culays ayaa naga hor yimiday oo shaqo wal oo la qabanayaa culays bay leedahay oo caqabado ayay leedahay waxaan ALLE mahadiis ah in aan intooda badan ka talaabsanay waxaanu la dagaalanay musuq maasuqa waxaanan suurto galinay in hanta badan oo qaran kani leeyahay ay khasnada dawlada gasho wanan ku faarax sanahay in miisaaniyada 2013 aan odoras keeda maanta indin hor keeno iyada oo sanadkii 2012 aanu wali dhamaan oo anan hubsanay in aan soo saarnay dhamaan dakhligii miisaaniyadii kalhore iyada oo dhamaystiran oo waliba ay wax dheeryihiin anu soo saarnay oo aanan idin soo hor dhigno misaaniyada sanadka cusub oo kabadan doonta sida aan xaga danbe ka sheegi doono

Miisaaniyada sanadku 2013 marka la eego misaaniyad xukuumada dhexe waxay ka badantahay ku dhawaad 20 milyan tii kalhore 106 milyan ayay hayd sanadkana waa 125,milyan weeyi ilaa 20 milyan ku dhawaad ayay ka badan tahay taas oo u dhiganta in ay ka badan tahay 17% tii hore miisaaniyadan 2012 00 106 milyan ahayd waxaa xusid mudan 106 daa milyan ku talo galka budget kaa waxaa la qoodeeya 96 milyan ayaa la qoondeeyay meelaha ay ka soobixi lahaayeen oo lagu qoon deeya

- Kastamada
- Cashuuraha bariga iyo
- Wasaaradaha

Oo 6 milayan wasaarada ay ku qornaayeen adkayd sida ay u soo baxaan 10 milyan ee soo hadhay wasaarada maaliyadu budget kii soo hadhay 2012 ka waxay ku qoondaysay dayn ama deeq taas oo macnaheedu oo in badget kaasi dayn ama dayn lagu helo taas oo alle madiis ah in aan helay anagoon dayn ama deeq midna qaadan aan soo saarnay 10 milyan iyo intii kalaba aan soo

saarnay oo 106 milyanba ay toos uga soo bexeen meeliii kala duwanaa ee dakhliga ka ururinaynay ee ay kastamadu kaw ka yihin.

Miisaaniyada sanadka 2013 waxaanu ku soo darnay mashaariic hore u marineed oo gaadhaya 10% ama ka badan, mashaariicdaa oo ku kic doonta 12milyan iyo badh meel gaara ayaanu dhignay kuma naan darin budget ka wasaaradaha si mashaariicdaa hirgalintooda iyo daba galkooga gaar u noqoto ay lagtoodaa aanay wasaaradu u isticmaalin oo aad ka heli doontaan buuga miisaaniyada mashaariicdaana waxaa ka mid ah

1. In sanadka 2013 in aan ku talo gashanahay markii koobaad in cidankeenu darajada ay qaataan oo mushahalka lagu siiyo taas oo kalfi doonta lacag badan taas oo aan si toos ah aan ugu soo darnay misaaniyada.
2. Mashaariic la xidhiihda Beeraha, kaluumaysiga, wadooyinka, Maadaaradda, Ciidanka Bada, iyo in aan markii koobaad ee aan galinay budget in dalka loo soo iibiyo dab-damiyayaal.

Miisaaniyada 2013ku waxay ka badan tahay miisaaniyadii ka horeeyay xukuumada kulmiye 150% waxaanaykabadan tahay 17% tii kalhore. Run ahaatii sida aan xusay waxaan mahad balaadhan u soo jeedinayaa dhamaan cidkasta oo nagala qayb qaadatay dakhli ururinta waxaan halkan ka codsanaynaa dad weynaha Somaliland ee ay cashuuru ku waajibeen in ay sanadka 2013 ee dhawaan inoo bilaabmi doo in ay sidii kalhore iyo sika wanaagsan cashuurta u bixiyaan, waanan sanadka culayka saaraynaa cashuuraha bariga oo aan aamin sanahay lacag aad iyo aad u badan oo soo bixi lahayd ay ku maqan tahay.

Waxaanka baryay naa in dadka wanaag san ee cashuur bixiyayaasha ah In sidaa iyo si ka wanaagsan ay noola shaqeeyaan si dalkeenan yare e curdinka ahi uu u gaadho horumar inooguna hirgasho mashaariicda ay nudoonayno in aynu hirgalinaa, culaysna waa la saarayaa gaar ahaana dadka ay ku waajibtay cashuuta macaashal macaashka oo ay run ahaatii bixin teedu ay aad ugu adag tahay dadkeena, waxaan halkan ka gudbinayaa anbiil iyo codsi aan leeyahay markaynu ku dhiirano ee aynu run ka sheegno bixinta cashuurahaasi ayaa dalkeenu horumarka uu ubaahan yahay isha allaahu tacaalaa uu gaadhi doonaa.

waxaa kale oo aanu codsanaynaa in dadweynuhu sidii ay noola shaqaynayeen iyo si ka sii saraysa noola shaqeeyaan oo aynagu garab galaan si dkhligeenu kor ugu kaco waad ogthiin oo dalkeenu ma helo caawimo dawliya iyo caawimo taas ah midna waxaynu ku wadnaa cashuurtaa yar ee aan maanta dadka ka qaadno taas oo dakhligeenu maanta uu ka badan yahay wadamo badan oo si toosa loo caawiyo ILLAAHAY ayaa mahad leh waxaanan u mahadnaqayaa dadka hawshaasi naga caawiyay ee nagu garab galay waxananu jecelahay in sanadka 2013 ka waxaa noo qorshaysan in dhalin yarada la dhiiri galiyo oo ay wasaaraduhu qaataan ugu yaraan ilaa 10,500 oo dhalin yaro jaamiciyiin ah oo

wasaaradaha kala duwani qaadan doonaan ha ugu badnaato Wasaarada waxbarashada, wasaaeada caafimaadka iyo dhamaan wasaaradaha kala duwan, taas oo wax ka tari doonta shaqo abuurka dhalinyaradana jaanis siindoonta.

Sida oo kale mashaariicda aan ugu talo galnay in ay fulaan waxay ka qayb qaadan donaan shaqo abuurka waxaana ay door laxaad leh ka qaadan doonaan sida ay dadkeenu shaqo u heli lahaayeen waxaanan ku talo galsanahay in insha ALLAAHU diwaan galin rasmi ah la saymayn doono dalka taas oo aan u qoondaynay misaaniyada in wax loogu talo galo oo aan halkaa galinay iyada oo aan filayno in caawimooyin ay in soo gaadhaan si doorashooyinka danbe ee dalka ka dhici doonaa ay si xaq iyo xalaal ah u dhacaan oo qofna aanu xaq u yeelan mar wax ka badan in aanu codeyn, asxaabta qaranka oo aanu aragno waajib in la dhiiri galiyo waxaan budget ka aanu intii sanadkii hore ahaa aannu u libin laabnay iyada oo aan jeclayn itaa in ka badan in aan siino balse way noo suuro gali weyday.

Miisaaniyada sanadka 2013ku waxay ka koobantahay Afar qaybood:-

- Miisaaniyada dawlada dhexe oo noqon doonta 750 milyan una dhiganta 125 milyan oo doolar.
- Misaaniyada hay'adaha madaxa banaan 215,127,259,668, s/lsh una dhiganta 35, 854, 545 $ dollar.
- Dawladaha hoose miisaaniyadoodu waxay noqon doontaa 71, 156,92, 83 sh/SL una dhiganta 21,854, 488 $ dollar.
- waana jiri doonta deeq toos la inoo siin doono oo aan ku jirin budget ka xukuumada dhexe ee aan idiin sheegay ay ay si toos ah inoo siin doonaan Dawladaha Denmark iyo Ingriisku deeqdaa oo dhamaan doonta sanadka 2013 13milyan waaanay gali doontaa budgetka guud ee dawlada kuman jiri doonto dakhliga gaarka ah ee dawlada hoose.

Afartaa qaybood ee aan soo sheegay mid walba waxaa ku jira korodh dhanka kale awal may jirin deeq caalamiya sanadka way ku jirtaa dakhliga siguur ugu soo xeroondoonta dawladu waa 185, milyan taas oo miisaaniyadii hore ka badan doonta ku dhawaad 40 milyan oo dollar.

Wasaarada iyo xukuumadu waxay culayska saari doontaa mashaariicdaa aan soo tilmaamay oo ah runtii mashaariic hore u marineed waxaa kale oo aan samayn doonaa insha hadii ALLe inoo suurto galiyo Somaliland E passport oo aanu u aragnay in uu mihiim u yahay dhamaan madax deena iyo dhamaan umada reer Somalilandba oo aanu budgetka wax kaga darnay sanad ka waxanan u mahad naqayaa dhamaan shaqaalaha wasarada ee dhalin yarada ahaa gaar ahaan kuwa kastamada Kalabaydh, Barbara, Salaylac, Boorama Beer ee dhamaan ka shqeeyay shaqadaa badan ee ka dhacday dalka waxaan marlabaad u madcelinayaa gudoomiyaha iyo dhamaan golaha sharafta mudan

marlabaad aan salaamayaa waxanan idinka codsanayaa in aad ansixisaan si ay u dhaqan gasho bilawga sanadka 2013ka waad mahad santihiin.

## Kal-fadhiga 20aad Fadhigiisa 5aad

***29/12/2012***

**Ajendaha:-** Su'aalo laga weydiinayay Wasiirka Maaliyada oo ku Saabsan Miisaaniyada Qaranka ee 2013.

**Gudoomiyaha Md. Baashe:-** waxaa maanta marti inoo ah Wasiirka Maaliyada oo aynu Su'aalo ka weydiineyno Miisaniyada Qaranka ee 2013da, Markaa Mudanayaashu Su'aalaha ha koobaan oo yaaney 2 su'aalood ka badan.

**Su'aalihii.**

1. **Md. C/raxman Maxamed Jaamac (Xoog):-** marka hore Shir-gudoonka, Mudanayaasha Sharafta leh Wasiirada sharafta leh iyo shaqaalaha Wasaarada Maaliyada ee halkan fadhiya waan idin salaamayaa.

**Su'aal.**

1. Wasiir paggeka 15aad ee Miisaaniyadan 2013da waa wax-kabadalka tacriifadaha waxaana ku qoran Sanadkan waxaa la isla qaatey in wax ka badal lagu sameeyo tacriifadaha laqaado, markaa cida isla qaadatey waad noo sheegi?
   Tacriiftii hore ee aad kordhiseen sida cashuurta wada marista oo 50% aad kordhiseen side bay macquul u tahay ma dhaqaalihii baa kordhey?, warqada danbi la'aanta 6000 bay ahayd 60,000 baad ka dhigteen oo 10 laab baad kordhiseen aduunka labanlaab baa la-kordhiyaa sidee bay tasina macquul u tahay Golahi ansixiyo tacriifad intaa le'eg?
2. Sida uu qabo **Qodobka 14aad** ee dastuurka ee Waajibaadka cashuurta iyo takaaliifta waxaa loo eegaya danta maslaxada oo cashuur iyo takaaliif aan xeer dejin lama qaadi karo, halkan waxaanu ku haynaa lacag laga qaadey Xildhibaan dhoofaya oo $10 ah, loogana qaadey bahasha securityga lagu baadho ee dadka la mariyo oo ay ahayd in xildhibaanka laga xishodo, xildhibaankii isagoo u hogaansan shaqaalihii la amrey, Markaa Wasiir Cashuurtan yaa waajibiyay, Miisaaniyadase ma ku soo darteed $10kan?

**Jawaab Wasiirka Maaliyada Md. C/casiis Maxamed Samaale**:- dhamaan shir-gudoonka, Mudanayaasha sharafta leh iyo Saxaafadaba waan salaamayaa, aad baan ugu faraxsanahay in Wasaarada Maaliyadu markale hor-imaado Golahan sharafta leh si aad Miisaniyada 2013 wax nooga .

**Jawaab1aad.** C/raxman aad buu u mahadsanyahay, wixii cashuuraha ku saabsan haday tahay kordhin iyo hadey dhimis tahayba Golaha ayaa leh oo sharciyeeyey, anaguna waanu idin horkeenay, waxyaabaha yar yar ee aanu kordhiney waa waxaan saameyn badan ku lahayn bulshada haday tahay tan baabuurta, dalxiiska iyo IWM, dakhliga ka soo hoyanayaana maaha mid weyn xaga miisaaniyada, laakiin Baabuurta oo inagu badan dakadeena buuxiyay oo intaa ka soo degaya, Wada xumada iyo cidhiidhiga ay ku jiraan ognahay, ayaa wax yar oo aan badneyn lagu kordhiyay, sidaad ogtihiin hawluhu way qaybsan yihiin Golaha Wakiilada oo wixii sharciya aanu uga danbeyno idinka iska leh waana idiin soo gudbiney go'aan ka gaadhisteedana idin ayaa la idinka sugayaa.

**Jawaab 2aad.** arrinta ku saabsan $10 ee madaarka lagu qaado Wasaarada Maaliyadu ma qaado, Wasaarada Duulista iyo Hawadaa qaada, angu Wasiirka waanu uga yeedhney oo ka kulanay Wasiirkuna wuxuu sheegay isaga laftiguusu inaanu war u haynin ee ay tahay hawl ay wadaan dad nabadgalyada iyo Securityga Madaarada qaabilsan, waxaana jeclaan lahaa arrinta in looga yeedho wasiirka ay khuseyso, waad mahadsantihiin.

2. **Md. Xasan Cawaale Caynaan:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Wasiirka iyo Shaqaalaha kale ee Wasaarada dhamaan waad salaaman tihiin, Mudane Wasiir waxaad tahay Wasiirkii ugu horeyay ee keena Miisaaniyada Qaranka xiligeedii intaanu sanadkii dhamaan, taariikhda dalkana meelbay ka gashey.

**Su'aal:-**

1. Su'aasha aan ku weydiinayaa waxay tahay kastamka kala-beydh dhismihiisu aad iyo aad buu u hooseeyaa, runtii sidii aan ugu garaadeystay ayuu yahay,waana hooyada labaad ee dakhliga somaliland wasiiradii horena kuma guuleysan inay dhisaan, Malaga yaabaa inaad adigu dhistid?

**Wasiirka Jawaab 1aad**. Xildhibaan Xasan wuu mahadsanyahay, runtii kastamada wadankoo dhan dayacayaad farabadan baa ka muuqata, waana waajib in wax laga qabto waad ogtihiin dhismayaal badan oo wasaaradu ka mid tahay sanadkan ayaanu dhisney, xaga kastamada,

kastamka  cashuuraha bariga Magaalada Barbera oo mudo 20 sano ka badan dunsanaa sanadkaanu ku guuleysanay inaanu dhisno, waxaanu dhisney seylac Hangar weyn oo ay u baahan yihiin dadka alaabada soo marinayaa ayaanu dhisney, dhismayaal badan ayaanu wax ka qabaney, waxaa noo qorsheysan inaan wixii aanu ku dari karno, hadey tahay kala-beydh, beer, lowyacado iyo caynabo insha'alaahu tacaalaa, anagoo eegayna hadba baahida dhimayaashooda.

3. **Md. C/qaadir X. Jirde Ismaciil**:- Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Wasiirka, Wasiiru-dawlaha iyo Madaxda ama hawl-wadeenada Wasaarada waan idin salaamayaa ugu horeyn.

**Su'aal:-**

**1.** Wasiir mabda'a Maamul-wanaagu wuxuu ina farayaa inaan la tarmin hay'adda ee wixii sharciyan isu raacayaba la is-raaciyo, halkan waxaa ka muuqda Wasaarada Waxbarashada iyo tacliinta sare oo Miisaaniyadeedu tahay *konton bilyan iyo dheeraad*, waxa kaloo jira Guddida tacliinta sare iyo Agaasinka Tacliinta Sare, ma haboon-tahay in tacliinta sare gooni looga saaro oo Wasaarad laga dhigo intay saddexdaa Miisaaniyada lagalinayo oo ina farayo mabda'a maamul wanaagu, waxaa kalo jira komishano badan oo meelo kale raacikara, waxaynu leenahay Wasaaradii Dib-udejinta oo qaabilsan sida dadka dib u soo noqdey loo caawin lahaa ama Mucaawinooyinka loogu qeybin lahaa, halkan waxaa ku jirta hay'ad shaqadii Wasaaradaa qabaneysa?

**2.** adigoo ku mahadsan miisaaniyadii sanadkii hore waxaad ku soo darteen 2%ka Gobolada bari intuu yahay oo ahayd 22.5 milyan, Miisaaniyadana iyada kumeydaan soo darin, Markaa ma noosheegi kartaa Odoroska Gobolada Barri intuu noqonayo isna?

**3.** waxaa kaloo jira Komishanka Qurba-jooga inagoo leh Wasaaradii Arrimaha Dibada, Miyaaney Habooneyn inagoo ilaalineyna Mabda'ii Maamul-wanaaga inaynu kala ilaalino in la isbaalyaaco oo Wasaaradii Arrimaha Dibaduna gaar ula xidhiidho, komishanku gooni ila xidhiidho, Wakiiladeena dibada joogaana gooni ula xidhiidhaan, ma idinla tahay in shaqadaa la mideeyo oo meel la isugu-geeyo?

**Wasiirka Jawaab:-**

**Jawaab 1.** Mudane C/qaadir wuu mahadsanyahay, way haboon-tahay inagoo ilaalineyna Mabda'aa Maamul-wanaaga in wixii israacaya la israaciyo,  fikrado badan oo noocaas ahna waan qabnaa, hadaad

akhridaan policyga Guud Miisaaniyada meel badan oo israaci karaya in la israaciyo waanu soo jeediney waana qabnaa , Wasaarada Waxbarashu waxay ka mid tahay wasaarada halbawlaha oo dhalinta iyo dadka ugu badan gacanta ku haysa, angu qadarin aad u badan baanu u haynaa, waana Wasaarada ugu budgetka badan wasaaradaha shaqada ay hayso darteed ee waxbarashada iyo tacliinta sareba, in wasaarad kale laga dhigaana waxaan isleeyahay wasaaradaha inagu badandoona, budgetkana aad bay uga muuqdaan in la israaciyona waanu soo jeediney.

**Jawaab 2.** 2%ka Gobolada barrigu Miisaaniyada way ka muuqataa, khasnada dawladayna ku jirtaa, odoroskana way ku jirtaa budgetkeeduna waa 24 **milyan** sanadkan, waadmahadsantihiin.

**4. Md. Maxamed Barkhad Miigane:-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, Wasiirka Maaliyada iyo Madaxda kale waad salaamantihiin.

**Su'aal.**

**1.** Su'aasha aan doonayaa inaan ku weydiiyo, madaama aad taha Wasiirkii Dawlada u qaabilsanaa Maaliyada, ka wasiir ahaan assetka baanka inoo yaal ka maaliyada ahaan waa intee madaama aad macaamiil leedihiin?

**Wasiirka Jawaab:-**

**1.** Wuu mahadsanyhay mudanuhu, arrinta su'aasha assetka ee Baanka la xidhiidha, hawshaa Baanka ayaa ku shaqo leh, Baanka ayaad weydiineysaan, waad mahadsantahay.

**5. Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Madaxda Wasaarada ee ay hogaaminayaa Wasiirka iyo Wasiirka Maaliyada way salaaman yihiin, Waa Markii ugu horeysay ee Miisaniyadu ee sharciyan on time ku timaado, dedaal iyo hawlkarnimaa ka muuqata, wayna ku mahadsan yihiin Wasaaradu.

**Su'aal:**-

**1.** Wasiir waxaan ku weydiinayaa inkastoo aad adigu meelo farabadan baad martey, laba arrimood baa bulshada ugu daran baahiyaha yaala, mid waa Caafimaadka, tan kalena waa disasterka deegaanka ku socda, Gobolo iyo deegaano badan baan socdaal ku

marney, inkastoo maalintii dhoweyd xafiiska shirgudoonka aad si fiican u sharaxdey waxyaabahaad ugu tala gasheen oo runtii ku filan wakhtigan, su'aasha aan ku weydiinayaa waa deegaanka, deegaanka Miisaaniyada ugu jirtaa waa 2 milyan, Ciidanka ilaalada Xeebtaa saddexlaab ka miisaaniyad badan, halkaa baahidaasi miyaaney idiin muuqan Wasiir ee deegaanka ku socotaa lana xaalufinayo oo xoolahii dhaqaalaha ugu badan aan ka helnaa ku noolyiin?

**2**. Tan kale, Miisaniyada marka laga hadlayo Gobolo iyo Degmooyin baa jira, Miisaaniyada kama muuqato Breakdown ma jiro, markaad xildhibaan tahay ee deegaankii lagaa soo doortey aad joogto waxyaabaha aad arkeyso waxaa ka mida miisaaniyada dhinaca adeegyada bulshada inta badan ma dhaafto xarunta wasaarada wax yar yar baa gaadha, hadaad is tidhaahdo degmadaadii ka hadal ma ogaaneysid, taana maxaa lagu ogaanayaa wixii Miisaaniyadii ka gaadhey Deegaanka ee adeega bulshada?

**Wasiirka Jawaab:-**

**1.** Xildhibaan Axmed wuu mahadsanyahay, arrinta Caafimaadka iyo deegaanka la xidhiidha iyo baahiyaha Guud ahaanba yaala runtii waa wax qof walba dareemayo oo uu ka damqanayo weeyaan, Caafimaadka iyo Waxbarashada biriyoorati badan baanu siiney miisaaniyadooduna way ka badan tahay kuwa kale, kal hore wasaarada Caafimaadka waxaa ugu jirey qalab loo iibinayay oo budgetkoodu milyan iyo dheeraad ahaa, ku dhowaad 2 milayan oo qalab loo iibinayay baa ka go'ay oo dib loo dhigey hadana budgetkoodu isma dhimin, waxaa ku jiraa shaqaale badan oo ka soo baxaya jaamacada oo ay qaadanayaan, horumar baa ka muuqda oo markii ugu horeysay qaliino dibada loo tagi jirey ayaa dhakhtarkeena lagu sameeyay oo dhakhaatiir ajaanibi joogto, taas intaas ayaan ku dhaafayaa.

arrinta deegaanka, runtii wasaarada deegaanku waxay ka mid tahay Wasaradaha Qaranka halbawlaha u ah, hubaal waxaa ah wasaarad walba waxay u baahneyd ineyna buuxin kareyn baa jirta, Wasaaradu Dhisme malaha, waxaanu ugu tala-galney in wasaarada Dhismo loo kireeyo oo budgetka ugu darney, budgets ka danbena

dhismo loo dhiso, way jiraan ilaalinta deegaanka heads loogu talogaley aanu oo budgetka ugu darney wey jiraan, laakiin ma wada buuxin karno baahiyaha Wasaaradaha oo dhan, waana ku dedaali inaan Budgetka Wasaaradaas kordhino.

**2.** Arrinta Gobolada iyo degmooyinka, runtii wasaaraduhu si weyn bay Gobolada ugu hawlgalaan, intaan wasaarad joogey dalka bari iyo galbeedba waan marey, baahiyaha iyo waxa jira waan soo arkey, sidaa li'ajligeedna miisaaniyada sanadkan meelo badan oo aanu arkeynay inay hawlbawle yihiin ayaanu gailney oo ka muuqda hadey tahay dhanka xoolaha iyo Beeraha wasaaradaha kuma jiraan oo qeybta gaarka ah ee aanu ugu talagalney horumarinta ayaanu galiney, goboladu iyo degmoyinka dhinaca budget u-gaara oo ah tii dawlada hoose ayay leeyihiin oo inay horumarka ka qeyb-qaataan ay tahay, culeyska u badan sanadka wuxuu naga qabsadey wasaarado badan sidii shaqaaleheedu gobol walba ugu hawl-galilahaayeen oo shaqaale wasaaraha oo dhan ka socdaa uga shaqeyn lahaayeen ayaanu sameynay, waadmahadsantahay.

**6. Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha Golaha Wakiilada, Wasiirka Maaliyada Md. C/casiis Samaale, Wasiiru-dawlaha Wasaraada Maaliyada Md. Cadaani dhamaan way salaaman yihiin, Miisaaniyadan Wakhtigeedii baa la keenay waana Markii ugu horeysay, runtii Golaha iyo Wasiirkaba sharaf bay u tahay waliba si wanaagsan baa loo kordhiyay waana ku mahadsantihiin.

**Su'aal.**

**1.** aniga su'aalahaygu way kooban yihiin sacaadatul wasiir, su'aasha hore waxa weeye waxaa dakhliga ku jira Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha, anigoo jecel in Wasaarad Miisaaniyada ku jirta la soo magacaabo ay ka wanaagsan tahay in marka hore wasaarada la soo magacaabo, hadiise Wasaaradaa la waayo oo aan la soo magacaabin budgetkaasina sidaas ugu jiro, ma kuu qorsheysan tahay budgetkaa waxaad ku badasho?

**2. Wasiir** anigoo ka duulaya $10 ee Madaarka lagu qaado, nidaamka dawliga wuxuu inoo sheegayaa in wixii takaaliifa ee dadka laga qaadayo in Xeer jeediyo Golahanina ogolaado, waxaana maamulisteeda iyo qabasheeda u qaabilsan Wasaarada Maaliyada, hadii Security Wasaarada

Duulista iyo Hawadu $10kaa inagu meel martey, maanay suurtagal ahayn in barito Wasaarada Xanaanada Xoolahuna inay xoogaaa adhiga dhib ku mariyso jideystoo, taasina maanay baal marsaneyn nidaamkii dawliga ee maamul-wanaaga iyo sharciyadaba meel kadhac ku ahayn mudane Wasiir?

**3.** dakhliga Somaliland for the past 10 years waxaa sharaf inoo wada ah **750 bilyan** budgetka maanta aad noo keentay marayaa, **2002kii 79 bilyan** buu markaa inaynu koreyno waa wax sharaf inoo wada ah, hadaba ha koree waxbaa inagu iman kara oo masiibooyin dibiiciya ayaa soo darsi kara ama dagaalaa iman kara, Miyaaney Habooneyn haba-yaraatee 10% am 3% iyo wuxuun inaynu keyd ka dhigano oo keyd qaran u qorsheysano oo aanu kharashka ku jirin, miyaanay taasi suuro gal ahayn?

**Wasiirka Jawaab:-**

**1.** Wuu mahadsanyahay Axmedyasiin, Su'aasha Wasaarada xidhiidhka ku saabsan la xidhiidh, horta Magaca Wasaarada Xidhiidh Golayaal ma jirto C/casiisna Wasaaraha Ma magacaabo, maalintii horena C/raxman baa iweydiiyay oo jaraa'idadu siyaabo kala duwan u dhigeen, Xafiiska Xidhiidhka Golayaasha ayaa jira, oo hore u jirey budgetkana ku qornaa, Malaha type eror baa dhacdey tusmadana budgetka wey ku jirtaa oo Xafiiska xidhiidhka Golayaasha ayaa qoran, haday Wasaarada Saemysantana, wasaarada ay ka go'dey bay budgetka la qeybsaneysaa oo culeysa ay inagu yeelanaysaa ma jirto.

**2.** Tan 10ka dollar ee Madaarka ku saabsan, runtii dareenka aad ka qabtaan baan ka qabnaa oo wasaarada Maaliyadu ka qabtaa oo inaan shuruucda dhaafin baan noo jideysan, sidaa li'ajligeed 10kii dollar ee Baanka budgetkaanu ku darney oo Baanku wuxuu u baahdo wasaarada ayuu ka soo codsanayaa, arrintaa inaad Wasiirka ku shaqada leh u yeedhaan oo wax ka weydiisaan baan jeclaa, anaguna waanu ka kulney wasiirka arrintaana xogo badan baa uga dhinaa markaa arrinta si'aan sharciga u waafajino waxay noqoneysaa inaynju ka wada hawlgalno

**3.** arrinta ku saabsan Keyd inuu qarankani yeesho, waad ogtihiin oo dalkuuna wali aqoonsi muu helin, budgetkeenu waa mid xadidan alxamdulilaah inuu sanadba sanadka ka danbeeya uu kordho laakiin ma qeybsamo, oo waad arkeysaa oo Wasaarada walba baahideeda budgetkay u baahneyd kala-badh baa ka maqan, sidaas oo kale hadeynu nidhaahno

keyd aynu sameysano ayaaney uga qeybsameyn, oo weynu jecelnahay ee dalkeenu keyd yeesho, laakiin insha'laah weynu fileynaa iney yeelan doono iyo inay cid ilaahay gaadhsiiyo, Wasaarada walbana mashruuca fuliwaaya ee baaqda wey ka muuqataa khasnada lacagteedu  oo haduu fuliwaayo keyd ahaan ugu taalo.

**Gudoomiyaha:**- Xildhibaanada waxaan ogeysiinayaa in arrinta 10 dollar ee madaarka wasiirka Duulista uga yeedhno oo wax ka weydiino, markaa su'aasha arrintaa Wasiirka Maaliyada lama xidhiidho, su'aalaha kale ee miisaaniyada aynu ku koobnaano, waad mahadsantihiin.

7. **Md. Axmed Maxamed Obsiiye:-** shir-gudoonka, Wasiirka, Wasiiru-dawlaha, dhamaan Xubnaha Golaha, Hawl-wadeenada Wasaarada Maaliyada iyo Saxaafada waan idin salaamayaa, runtii amaantii xildhibaanadu ay amaaneen miisaaniyada  iyo inay wakhtigeedii ku timi waan la qabaa xildhibaanada, dooda ayaan la sugayaa oo maadaama ay  su'aalo tahay laba su'aalood ayaan wasiirada iyo hawl-wadeenada weydiinayaa.

**Su'aal.**

1. Sacaadatul Wasiir, suurtagal ma tahay in nambarada iyo figureskii miisaaniyadii hore ku qornaa si khalad loo been-bguuriyo ama laga helo Miisaaniyada iminka na hortaala lafteeda laga helo isugeyn khaldan iyo waxyaabo farabadan oo dhici karta iney khalad abuurto, hadey jirto maxay u dhimeysaa Miisaaniyada iyo wax qabadkeeda?
2. Waxaa jira madax-xigeeno sida mushahar shaqaalaha aan joogtada aheyn, markaa inay ka badato Miisaaniyada laba Wasaaradood oo tusaale ahaan Wasaarada Hawlaha Guud iyo Wasaarada Diinta awqaafta oo la isku daray madax-xigeenkaasi ka bato? hadey suurta gal noqotona sidey uga badatey?

**Wasiiirka Jawaab:-**

1. Xildhibaan Maxamud Obsiiye wuu mahadsanyahay, anagu waxaanu ugu talagalney oo khaladaada ma jiro ama aanu ku ognahay idinku Goluhu Wakiilada tihiin oo wixii khaladaada waad ka saari kartaa, waxwalboo bini'aadmi semeynayo khaladaad wuu ku jiri karaa, oo khaladaad lama sameyn karo lama odhan karo, aad baanu isugu tagney hadey tahay isugeyn iyo sideeda kale qalabka aanu iminka u isticmaalnona khaladaad ma sameyn karo, markaad dooneysaan inaad

sidatan wakhtigeeda keeno dag-deg badan baan sameynay, idinkuna waad nala eegidoontaad?

**2.** tan madax-xigeenada, madax-xigeenadu way badan yihiin oo mid walba wax gaaruu qabtaa, hadey tahay madax-xigeenka shaqaalaha aan joogtada ahayn iyo midkaleba, waana mushaharaad waad ogtihiina dalkeena shaqo la'aan badad badan baa jirta oo in mushaharaadku bato waa loo baahan yahay, sidaan idiin sheegayna sanadkan in shaqaale badan la qaato aan miisaaniyada ku darney, oo wasaaraduhu qaadanayaan gaar ahaan Wasaarada Waxbarashada oo ugu badan wasaaradaha kale shaqaaley qaadanayaan, wasaaraduhu wey kala budget badan yihiin sida kuwa xildhibaanku sheegay hadaad eegtaana waxay ka mid yihiin wasaaradaha aanu budgetkooda sare u qaadney oo ka muuqataa faraqa.

**Agaasimaha Guud Jawaab:-** xildhibaanada waxaan u faah-faahinayaa su'aasha sub-heads shaqaalaha aan joogtada ahayn, waxayna jawaabteedu tahay mushaharkaa badan ee meesha ku jira waxa weeyaan marka laga bilaado madaxda dawlada oo ugu horeeyaan Agaasimayaasha Guud iyo wixii ka sareeyo oo ku jira shaqaalaha aan joogtada ahayn.

**8. Md. Ibraahim Axmed Haybe:-** Gudoomiyayaasha, Mudanayaasha, Wasiirka Maaliyada, Wasiiru-dawlaha iyo Hawl-wadeenada waan salaamayaa, way ku mahadsanyihiin keenida miisaaniyadan waana ugu hambalyaynayaa inay wakhtigeedii keeneen oo aad u qurux badan dedaal badanina ka muuqdo, qodobo aanan hore u arki jirin iyo horumar farabadan ka muuqdo, meelaha aan aad u jeclaystay waxaa ka mida oo ku jira 2.2 milyan dollar loogu talo-galey mashaariic horumarineed taasoo abuuridoona shaqooyinkii aanu ubaahneyn iyo 1500 shaqaale ardeyda jaamacadaha oo la qaadanayo sido kale darajadiii oo in badan dadka aynu u sheegi jirney laakiin markii ugu horesay miisaaniyada maanta ina hortaal ku jirta, hadaan su'aalaha u soo noqdo.

**Su'aal.**

**1.** Sacaadatul Wasiir waxaa dhaqaalaheenu ku basegareysan yahay waa xoolaha, waxaa magaalada Musqdisho laga furey sidoo kale kilinka shanaad slaoughter house baa laga furey oo xoolihii bay inala qeybsanayaan odoroskiina sanadka soo socda markaa cabsiyahaa soo socda ma ka tixgaliseen?

2. Miisaaniyada waxaa saldhig u ah cashuraha bariga, waayo cashuuraha kastamisku waa waxaa ka degaya ama imanaya oo isbadal baa ku iman kara, markaa waxa saldhiga u noqon kara dakhligeena oo ah tan joogtada inay noqoto waa cashuuraha bariga, Wasaarada Maaliyaduna sanad walba dhibaatadaa wey sheegi jirtey, qorshayaalna wey inoo sheegi jirtey waxna kama fulin jirin, sanadkan maxaad u haysaa ee qorshe oo aad ku talo gasheen?

**Wasiiirka Jawaab:-**

1. Xildhibaan Ibrahim aad mahadsanyahay, labada su'aalood mid wasiiru-dawlaha ayaan u deynayaa tan cashuuraha, arrinta la xidhiidha xoolaha iyo inay jirto meelo ka furmaan maxjaro, Wasaarada Xanaanada Xooluhu halbawley inoo tahay, sidaa darteed hadaad budgetka eegtaan waanu ku kordhin budgetka wasaarada Xoolaha, meelo karo oo aan budget wasaarada ka muuqan laakiin dhinaca horumarinta ku jirta waanu ugu talagalney, iney soo kordhayaan oo meelo badan tartar ka imanayo, inaan tartankaa ka qeybqaadano oo aynaan ka gaabin waan dareensanahay wayna noo qorsheysantahay, sanadkana xoolihii dhoofey way ka badnaayeen kuwii hore inay ka sii bataan sanadaha danbena waanu ku dedaalaynaa qeybaana ka qaadaneysaa sidii kor loogu qaadi lahaa, su'aasha kale sxbkey Wasiiru-dawlaha ayaan u deynayaa.

**Wasiiru-dawlaha Maaliyada Jawaab:-**

2. Gudoomiyaha, Mudanayasha sharafta leh iyo dadka halkaa soo fadhiyaba aad baan u salaamayaa, waa maalintii iigu horeysey ee Golahan ka hadlo, maalintii lana ansixinayayna kamaan halin, runtii waxaan doonayaa inaan arrinta cashuuraha bariga ku saabsan ka hadlo, cashuraha barrigu dalkastoo aduunka jira waa waxa lagu saleeyo miisaaniyada, Wasaarada Maaliyadu shaqadeedu waa revenue collection, maanta ilaahay inaguma keenee hadii magaalada barbera markab lagu afduubo ama wax kaleba ka dhacaan miisaaniyadeeda dalka aynu ku xisaabtameyno kala badh baa la waayayaa ama xakad galidoonto, cashuuraha halkan ku yaala intooda badan waa kastamis waliba kasta barbera iyo kala-beydh.

Cashuuraha barigeenu waxa inaga soo gala waa **7% out of 100%,** markaa inaynu wax ka badalno oo aynu policy ahaan madaama tihiin sharci-dejin inaad arrintaa kor u eegtaan waa meesha ku jirta inay 20 sano gaadhona may ahayn, ka wasaarada maaliyadeed ahaan waxaanu in sanadkan cashuuraha bariga ka dhigo waxaanu kaloo qabnaa **12 to 14%** ka dhigno hadaaney ka badan, sida kaliyee cashuuraha barigu ku soo bixi karaan waa mid qudha islaanta kabadhka majinta qaadka ku haysataa wey bixisaa cashuurtii laga rabey ninkii waxa la soo degaa wey bixiyaan, markaa dadka taajiriinta ah waa inay bixiyaan cashuuraha ku waajibey, cashuurtuna aaney noqon hebel baa sareeya iyo Hebelbaa taajira oo aaney wax cid ku xidhan noqonin qofkasta oo ay ku waajibteyna waa inuu bixiyaa, waanad mahadsantihiin.

**9. Md. C/raxmaan Cismaan Caalin: -** mudane Wasiir iyo Wasiiru-dawlaha waan idin salamayaa amaanta iyo bogaadita mudanayaasha waan la qabaa:-

**Su'aal.**

1. Waxaa iiga muuqda halkan hay'do aan la sharciyayn ama aan sharci lahayn, Golahana la keenin wali sharcigoodii, miisaaniyadana ku jira arrintaasina in badan bay soo noqnoqtey oo horena loo keeni jirey, kana mid yihiin hay'adda quality controlka, hay'adda Qandaraasyada iyo komishanka ICTda, markaa hay'adahase sidee baad procedurekii u marineysaan?
2. Hay'ada u xilsaaran baashista xabaalaha oo aan ahayn iminka Xafiis shaqeeya markaa muxuu miisaaniyada ugu jiraa?

**Wasiirka Jawaab:-**

1. Hay'addaha aad sheegtey sida hay'adda qandaraasyadu waa hay'ad dastuuriya, hay'addaha aan sharciyeysanayn anaga ka wasaarad maaliyadeed ahaan waxaanu ku dedaalaynaa sidii dakhli aanu u soorno, arrinta hay'adahaasna waxaan rajeynayaa in shirgudoonka iyo Madaxweynuhu ka wada xidhiidhi doonan, anaga noogu duceeya in hayshaa dakhliga ah in ilaahay noo fududeeyo.

**10. Md. Maxamuud Jaamac Cilmi (Dable):-** dhamaan marka hore waan idin salaamayaa, Sacaadatul Wasiir aad baan idiinku bogaadinaynaa hawsha iyo

dedaalka farahabadan ee aad qabateen, anaguna wixii aanu idinku kordhin karno ayaanu idinku kordhineynaa.

**Su'aal.**

1. Lacagtan soo dhacda ee Hay'adaha Caalamiga oo 200 ama 300 oo malyuun dollar ah noqotaa in Miisaaniayda la soo galiyo weeyaan, wax badan waanu ka hadalney oo cidi dhag umey dhigin, markan waxaan tilmaamayaa lacagta halkaa ka soo baxda ee la inagu caawiyo ee qorsheynta soo marta xaq waxaad u leedihiin inay idiin timaado oo sidaad miisaaniyada u soo sameysaan aad ku soo dartaan una qorsheysaan wixii lagu qaban lahaa?
2. Burkiino Fasto waa wadan yar oo afrika ku yaal sida wadankeenana waxaa ku yar biyaha, madaxweynaha dalkaasi wuxuu u yeedhaya hay'adihii caawinayay wuxuu ku yidhi maxaad ii haysaan, intaas oo boqol oo malyuun baan kuu haynaa, waxaad wadataan dib u dhiga buu yidhi anigu waxaan u baahanahay inaad intaas oo warood iyo ceelal noo dhistaan, biyuhuna waa nolosha waxa ugu muhiimsan, Marka Mudane Wasiir Miisaaniyada waxaad horumarka ugu talagasheen inaad budgetka ku talo gashaan oo warar iyo ceelal inoogu qodaan, tan kale, waxaan kaloo soo jeedin lahaa mudane wasiir itoobiya intaas boqol oo malyuun baa qaadkooda inaga baxa, waxay ahayd oo itoobiyana u baahan taha inaynu intaas oo mitirig tan oo milixa ka iibino, Kuwii hore sameyn waaye Mudane wasiir arrintaana isku taxaluji inaad abuurto.
3.

**Wasiirka Jawaab**

**11. Md. C/laahi Blacki:-** wasiir markaan akhriyey miisaaniyada waxaa ii soo baxday wasaarada balaadhan oo

**Su'aal**

**Wasiiirka Jawaab:-**

**12. Md. Ibraahim Axmed Reygal:-**

**Su'aal**

**Wasiiirka Jawaab:-**

**13. Md. C/qaadir Jimcaale Tukaale:-**

**Su'aal**

**Wasiiirka Jawaab:-**

**14. Md. Baar Siciid Faarax:-** Bismilaahi raxmaani raxiim waan salaamayaa wasiirka iyo wasaaradiisaba, waan ku hambalyaynayaa wakhtiga ay keenen miisaaniyada.

**Su'aal:**

1. Waxaan waydiinayaa wasiirka lacagta 2% ee gobolada bari ku qoran waxaad ku darteen miisaaniyada dowlada dhexe sida halkan ka muuqata een gobalada bariga dib u dhac badan baa ka muuqda sida xaqiiqda ah ama fogaanta ha ahaato ama ha ahaato meelaha ay ku taalo duruufta ay keento ma ku talo jirtaan inaad cusbitaalada siiba degmada dhahar iyo badhan oo aan lahayn ambalaasyo qofkii ka dhaawacmaa dhiig la'aan buu u dhintaa marka loosoo qaado ceerigaabo inaad uga iibisaan ambalaasyo makutalo jirtaan iyo mishiinada laydhka oo cisbitaaladu laayihiin?
2. Takale waxaa weeye madaxwaynuhu markuu ku jiray ololaha iyo mar dambaysayba wuxuu balanqaaday inuu wadada ceerigaabo wax ka qabto oo wadadaas maxay ahaytooy waxaa awoodiisa ah uu wax ka qabto saddexdii miisaaniyadood oo dowladu maxay ahaytooy shaqaynaysay midna Kama muuqato miyuu ka noqday madaxwaynuhu arinkaa waad salaaman tahay wasiir?

**Wasiirka jawaab:**

1. Bismilaahi raxmaani raxiim xildhibaan baar siciid aadbaad mahadsan tahay ee guud ahaan miisaaniyada sidaad ka warqabtaanba waxaa ku jirta mashaariic horumarineed waxaa ku jirta waxaana ka mida wadooyinka 2.2 milyan baan ugu talogalnay wadoooyinka laakiin waxaad ogtihiin laba milyan iyo badh doolar inaanay wadooyinka dalkena aanay wadooyinka dalkeena yacnii aanay wada dhamaystirayn amba aanay wax badan ka qabanayn, policy ga miisaaniyada waxaa ku jira oo hada lacagta mucaawinada dowliga ah ee saddex iyo tobanka milyan ah ee denmark iyo aynu ka helayno ingiriiska sanadka sida ku talo galku yahay waxaanu ugu

talo galnay inay iyaduna mashaariicda horumarka inay iyagu maamulaan laakiin inagu qoondeyno meesha ay galayso haday wado tahay iyo haday meel kale tahayba runtii waxaa laga yaabaa in pirority gu wadooyinka inoo noqdo oo shaqo abuurkaa aynu ka hadlayno ay wadada noqoto markaa ku talo galkaasi runtii wuu jiraa laakiin wadooyinku sidoodaba infrasturcture ku shay sahlan maaha yacnii budget keenan yar ee aadka u koobani wuxuu ka qaban karaa aadbuu uu kooban yahay waynuse jecelnahay wadooyinkana ahmiyad weyn baanu siinay sidaad hada budget ka arkaysaan meelaha ugu mudan eenu dakhliga u qoondaynay ayay ka mid yihiin

**2.** Arinta 2% gobolada bariga siday u baxayso way ku qoran tahay policyga miisaaniyada maxaa horumar galaya iyo maxaa galaya jaadkale galaya way ku qoran tahay ama nabadgalyo galaya sida qorsheheeda sida loo qorsheeyey way ku qaybsan tahay waxaanay ku qoran tahay buuga miisaaniyda hadii alle idhaahdo budget kaasi 2% ku si guud dakhliga wuu ugu jiraa ama dowlada dhexe wuu u galay todoba boqol iyo kontonka milyan, laakiin isticmaalkiisa sida loo isticmaalayo xukuumadu anagu u jidayn mayno wasaarada waxaad ka helaysaan bage 15 budget kiisuna waa afar iyo labaatan bilyan ku talo galka sanadka hadii alle idhaahdo sida loo maamulayo ama loo isticmaalayo wuxuu ku cadyahay miisaaniyada, arinta wadada ceerigaabo wadada boorama wadada wajaale ta oodweyne ta salaxlay mid walba wadankeenu waa u baahan yahay ilaahay idamkii waxaan rajaynaynaa in xukuumada kulmiye wada dhisto hadii alle idhaahdo waad mahadsantihiin.

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
|---|---|
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ------------------------------------------------------- | ------------------------------------------------ |

.